# Sidee hay'adaha maxalliga ee aan dowliga ahayn (NGOs) **u heli karaan taageero farsamo?**

GLOBAL NUTRITION CLUSTER
Technical Alliance

Ujeeddada warbixintaan ayaa ah in NGO-yada loo iftiimiyo qaabka Isbaheysiga Farsamada ee GNC (Isbaheysiga) uu u taageeri karo baahiyadooda farsamo iyaga oo qeexaya sida taageerada loogu fidiyay Hindisaha Horumarinta Gargaarka Afrika ee Soomaaliya 2021-di.

*Warbixintaan waxaa Isbaheysiga u diyaariyay ENN iyo xubno ka tirsan Kooxda Taageerada Farsamo ee Isbaheysiga. Waxaan jeeclaan lahayn in aan si gaar ah ugu mahadcelinno Cabdi Mooge Maxamed oo ka tirsan ARDI oo noo soo gudbiyay macluumaad ku saleysan waayo-aragnimadiisa ku aaddan taageerada uu ka helo Isbaheysiga.*

## Codsiga taagerada farsamo ee Isbaheysiga ee ka socota Hindisaha Horumarinta Gargaarka Afrika

Hindisaha Horumarinta Gargaarka Afrika (ARDI) waa hay'ad aan dowli ahayn, faa'iido doon ahayn iyo hay'ad tabarruc ah oo ka howlgasha Koonfurta Soomaaliya. Tan iyo 2018-ki, ARDI oo taageero ka helaysa UNICEF ayaa hirgelisay waxqabadyo kala duwan oo degdeg ah oo ay ka mid yihiin baarista nafaqa xumada, la-talinta quudinta dhallaanka iyo carruurta (IYCF), horumarinta biyaha, nadaafadda iyo howlaha fayadhowrka, horumarinta caafimaadka iyo abuurista kooxo taageero ee hooyooyinka iyo aabayaasha.

Kooxda ARDI ayaa warbixin gudaha ee soo baxday horaanti 2021-di ku qirtay baahida degdegga ah ee wax looga qabanayo daloolooyinka farsamada ee kooxda nafaqeynta – qiimayn awoodeed ayaa muujisay baahiyada nafaqo ee meelaha xaaladaha degdegga ah (quudinta dhallaanka iyo caruurta ee xaaladaha degdegga ah (IYCF-E), qiimeynta nafaqeynta iyo la socodka, maareynta nafaqo xumada ba'an iyo isbeddelka hab dhaqanka bulshada (SBC) iyo sidoo kale meelaha aan farsamada ahayn (oo ay ka mid tahay maareynta barnaamijka, maamulka dhaqaalaha iyo abaabulka kheyraadka). Qiimeynta ayaa soo saartay in saddex ka mid ah 29-ka shaqaale keliya ay weligood heleen tababarka isku dhafan ee maareynta nafaqo xumada ba'an (IMAM).

Iyada oo tan la tixgelinayo, ARDI waxay taageero ka codsatay Kooxda Isbaheysiga Farsamada ee Nafaqada Caalamiga ah (Isbaheysiga) si ay u xoojiso awoodda farsamo ee kooxdeeda, iyada oo marka hore diiradda saareysa tababarka IMAM. ARDI waxay rajeynaysay in tababarka noocaan ah uusan keliya kor u qaadi doonin awoodda ay ku fullinayso waxqabadyada nafaqeynta oo ay gaarsiiso heer sare oo tayo leh balse ay ururka gaarsiin doonaan heer wanaagsan oo ay ku hubiyaan maalgelin iyo iskaashiyo mustaqbalka ah iyaga oo taageero ka helay Isbaheysiga.

## Waa maxay **Isbaheysiga?**

Isbaheysiga waa farsamo caalami ah oo ujeeddadiisu tahay bixinta gargaar farsamo nafaqo oo la saadaalin karo, wakhtiyeysan oo la isku dubariday si loo daboolo baahiyaha nafaqeynta ee dadka ay saameyeen ama khatar ugu jira xaaladaha degdegga ah. Isbaheysiga wuxuu taageeraa dhaqaatiirta nafaqeynta iyaga oo siinaya taageero fog oo ka imaato la-taliyeyaal badan oo kala duwan iyo la-taliyeyaal farsamo, la-taliyeyaasha la geeyo dalka gudihiisa iyo helitaanka khubarro caalami ah oo ku aaddan dhowr mowduuc si loo horumariyo hagitaan ku-meel-gaar ah haddii la waayo hagitaan diyaar ah ama marka loo baahan yahay taageero si loo qeexo tilmaamaha jira.

## Sidee ku heli kartaa **taageerada Isbaheysiga?**

ARDI waxay awood u yeelatay in ay ku ogaato GNC-da iyo Isbaheysiga dhinaca raadin guud ee Google taas oo u hogaamisay website-ka Isbaheysiga. Xogta ku jirta website-ka ayaa ARDI u sahashay in ay aragto shaqada Isbaheysiga iyo in ay hesho lifaaqa 'Codsiga Taageerada' kaas oo Madaxa Fullinta ARDI, Cabdi Mooge Maxamed, uu ka codsan jiray taageero farsamo. Isla markiiba wuxuu jawaab ka helay xubin ka tirsan Kooxda Taageerada Farsamo (TST) waxaana bilawday wadahadal ku saabsan qaabka ugu wanaagsan oo u Isbaheysiga u taageeri karo ARDI.

Cabdi ayaa xusay in uu marki hore la yaabay in Isbaheysiga uu bixin karay taageero, isaga oo hore ugu guuldarreystay in uu la xiriiro dhowr NGO'yada aan dowli ahayn oo calami ah si ay uga taageeraan xoojinta awoodda iyo xirmooyinka tababarka.

## Waa maxay taageerada uu **Isbaheysiga bixin karo?**

Isbaheysiga wuxuu bixiyaa taageero farsamo oo dhinacyo badan ah oo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku koobneen, qiimeynta, IYCF-E, maareynta dhallaanka yar yar iyo hooyoyinka nafaqo ahaan khatar ku jira, maamulka bulshada ku saleysan ee nafaqo xumada ba'an, qiimaynta iyo SBC. Marka uu go'aaminayo sida Isbaheysiga uu u taageeri karo ururada, wuxuu dhageystaa codsadaha oo sharaxayo barnaamijyadooda iyo daldaloolooyinka wuxuuna kala shaqeeyaa si ay u abuuraan xeelado habboon oo dabooli karo baahidooda taageero.

Tusaalaha ARDI, wadahadallada ku saabsan sida uu Isbaheysiga taageero u bixin karo waxaa fududeeyay in ARDI ay hore shaqaalaha u la sameysay falanqeynta farqiga awoodda sidaas darteedna ay si wanaagsan u fahmeen meelaha ay taageerada uga baahan yihiin. Sida NGO-yo badan oo maxalli ah, ARDI waxay leedahay baahiyo badan, gaar ahaan marka la eego dhisidda awoodda hay'adeed, Isbaheysiga na wuxuu si dhow ula shaqeeyay ARDI si mudnaan loo siiyo daldaloolooyinkaas ee wax laga qaban karo. Waxaa la go'aamiyay in hab tallaabo la adeegsanayo iyada oo tababarka IMAM la bixin doono bilowga halka ay suuragal tahay in tababarka IYCF oo dabagal ah la tixgelin doono.

ARDI waxay sidoo kale laheyd dhowr baahiyo oo aan farsamo ahayn oo ay ka mid yihiin kaalmeynta maareynta barnaamijka, maareynta dhaqaalaha iyo abaabulka kheyraadka. Maadama uu Isbaheysiga diiradda saaro baahiyaha farsamo, ma uusan laheyn awood u ku qaabilo codsiyadaan. Si kastaba ha ahaatee, iyada oo ay jiraan baahiyo ka baxsan baaxadda iyo waajibaadka Isbaheysiga, Isbaheysigu wuxuu ARDI ku xiray hay'adaha kale oo taageerada sida Shabakadda Bulshada Rayidka ee SUN ee Soomaaliya iyo Kooxda Nafaqeynta Soomaaliya. Xiriirradaan ayaa suurogal ah in ay ARDI ka caawiiyaan qaar ka mid ah baahiyadooda aan farsamada ahayn. In kasta oo aan Isbaheysigu had iyo jeer taageeri karin dhammaan codsiyada, waxaa ujeeddadiisu ay tahay in uu fududeeyo iskaashiga ururrada bixiya tababarka aan farsamada ahayn ee noocaas iyo awood dhiska iyo kuwa laga yaabo in ay bixiyaan taageeradaas.

> 'Hay'adaha maxalliga ah ee aan dowliga ahayn waxay gaari karaan meelo INGO-yada aysan gaari karin, waxay faham u leeyihiin degaanka, waxayna u dhow yihiin bulshooyinka. Dhibka keliya ayaa ah in aanay xirfad lahayn oo ay u baahan yihiin illo kale oo badan.'
> - **Cabdi Mooge Maxamed**

## Maxay yihiin qaar ka mid ah caqabadaha ay la kulmaan INGO-yada sidee ayuu **Isbaheysiga uga shaqeeya sidi kuwaan looga gudbi lahaa?**

Ka shaqeynta xaaladaha degdegga ah ayaa inta badan ah mid aad u dhib badan islamarkaana kuwa ka shaqeeya NGO-yada maxalliga ah waxay la kulmaan dhibaatooyin gaar ah. Iyada oo tan laga warqabo, taageerada farsamo ee la siiyay ARDI waxay ahayd mid dabacsan, tusaale ahaan iyada oo la beddelaayo wakhtiyada tababarka iyo la qabsiga hababka tababarka marka loo baahdo. Si loo suurageliyo faham buuxa ee caqabadaha iyo macnaha guud, Isbaheysigu wuxuu doonaayaa in u isticmaalo khubarro farsamo ee ka socda dhan deegaan, qaran ama gobol. Marka laga hadlaayo taageerada la siiyay ARDI, ma suuragelin in la aqoonsado khabiir Soomaali ah, hasa ahaatee, Martha, khabiirka IMAM ee TST, ee ku sugan Uganda si wanaagsan na ugu hadasho afka Sawaaxiliga, ayaa diyaar ahayd. Tani waxay gacan ka geysatay in la isku xiro qaar ka mid ah kala qeybsanaanta luuqadaha iyo dhaqanka.

Inta ay Martha ku hadleysay af Sawaaxiliga, waxaa weli jiray caqabado luuqadeed (caqabadaha laga yaabo in ay taageerto hay'ado badan oo maxalli ah ee aan dowli ahayn) Isbaheysigu na wuxuu isku dayay in uu ka gudbo caqabadahaas iyaga oo howlgeliyay xubno ka tirsan ARDI oo turjumaan u noqon karo dadka aan ku hadlin Ingiriiska ama Sawaaxiliga iyo iyada oo wax laga beddelaayo tababarka si looga dhigo mid la heli karo oo ku habboon kooxda ARDI. Illaha oo laga dhigo kuwa lagu heli karo luuqado badan oo macquul ah ayaa hadda ah mudnaan socoto ee Isbaheysiga.

Saameynta cudurka Covid-19 awgeed, tababarka waxaa lagu qabtay qaab fog waxaana lala kulmay caqabado dhanka helitaanka kombayuutarrada iyo caqabadaha dhanka xiriirka internet-ka. Inta lagu guda jiray tababarka, kuwaan waxaa yareeyay tababarayaasha oo wadaagaya ama amaahanaya laptop-yada, Martha na waxay ahayd mid dabacsan oo tababarka u beddelayso wakhtiyada xiriirka internet-ka uu ahaa mid dhib yar. In kasta oo kan uusan ahayn qaab habboon, haddana wuxuu muujiyay in ay suurtogal tahay in tababarka lagu qaban karo fogaan wuxuuna bixiyay casharro taageero mustaqbalka ah.

## Ka waran **maalgelinta?**

NGO-yada maxalliga ah ayaa inta badan ku dhibaatooda helitaanka maalgelin si ay u hirgeliyaan barnaamijyada nafaqeynta iyo saameynta taageerada farsamo ee la bixiyo ayaa inta badan suuragelinaynin in la helo haddii hay'adaha maxalliga ah ee aan dowliga ahayn aysan awood u lahayn 'in ay ku dhaqmaan' wixi ay barteen inti lagu jiray tababarka iyo dhisidda awoodda. Dhanka kale, waxaa suurogal ah in kororka xirfadaha iyo awoodaha farsamo ay ururrada maxalliga ah ka dhigi karaan kuwo soo jiidasho leh marka la eego mustaqbalka fursadaha maalgelinta ee barnaamijyada. Qeybahaas oo kale waxaa la tixgeliyaa marka la sameynayo xirmo taageero oo loogu tallogalay ururrada maxalliga ah iyo go'aamada waxaa loo gaaraa si ku saleysan dacwad ku dacwad.

Tusaalaha ARDI, marka la eego himilada iyo xamaasadda, waxaa la dareemay in taageerada farsamo ay u faa'iideyn karto islamarkaana kordhin karto faylalka dhaqaale ee diyaarka u ah. ARDI waxay taageerada u aragtay in ay tahay mid horseed u noqon karta maalgelinta mustaqbalka waxayna muujisay dadaal ku aaddan tababarka iyada oo bixineyso qaar ka mid ah illaha gaarka ah ee ururka si loo hubiyo in mutadawiciinta ay ka soo qeyb galeen dhammaan fadhiyada tababarka.

Maadama Isbaheysiga uusan awood u laheyn in uu maalgeliyo taagero farsamo oo dhammaan ururrada maxalliga ah, waxay u baahan tahay in la hubiyo in illahooda si wanaagsan u isticmaalaayaan. Mid ka mid ah siyaabaha loo sameyn karo ayaa ah in lala shaqeeyo kooxaha hay'adaha maxalliga ee aan dowliga ahayn iyo in loo maro Kooxaha Nafaqeynta ee dalka gudihiisa si taageero ballaaran loogu fidiyo wax ka badan hal urur markiiba.

## Maxaa dhaco **taageerada marka la bixiyo ka dib?**

Isbaheysiga waxaa loogu tallogalay in uu noqdo xal ku meel gaar ah ee taageero farsamo oo xaaladaha degdegga ah. Sidaa darteed, taageerada waxay u badan tahay mid mudo gaaban (6-8 usbuux). Isbaheysigu wuxuu doonayaa in uu abuuro shuruudaha hay'adaha maxalliga ah ee aan dowliga ahayn, ka dib tababarka iyo taageerada, si ay u fulliyaan shaqada si heer sare oo tayeysan ama ay u heelaan taageero dheeraad ah iyada oo loo marayo habab kale (sida iyada oo loo maraayo Shabakada Bulshada Rayidka ah ee SUN). Si kastaba ha ahaatee, Isbaheysiga wuxuu sii wadaa xiriirka taageerada ka dib wuxuuna diyaar u yahay talo bixin haddii baahiyaha farsamo ee mustaqbalka la ogaado in kasta oo uu doonaayo in uu sidaas ku sameeyo qaab ku xoojiso hay'adaha maxalliga ah ee aan dowliga ahayn inay nafsadooda taageeraan.

Tusaalaha ARDI, tababarka ka dib, shaqaaluhu waxay awoodeen in ay tababaraan daryeel-bixiyeyaasha iyo xubnaha kale ee bulshada si ay u baaraan oo carruurta u gudbioyaan daaweynta nafaqo xumada. Sidaas darteed, daboolida daaweynta ayaa ku korodhay aaga ARDI ka howlgasho iyada oo aan laga eegin saameynada COVID-19 taasi oo meelaha kale u horseeday hoos u dhac la soo sheegay ee tirada dadka helaaya daaweynta. Waxaa la sheegay in Wasaaradda Caafimaadka ay uga mahadcelisay sida tababarka uu gacan uga geystay kordhinta daboolida iyo in ay u hogaamisay iska diiwaangelino badan ee caruurta nafaqo xumada hayso ee xarumaha caafimaadka ayna ka qeybqaadatay in caruurta xili hore la keeno taasi oo saameyn wanaagsan ku yeelatay natiijooyink daaweynta. Iyada oo loo maraayo taageeradaas, Cabdi Mooge Maxamed wuxuu sidoo kale u suurtogashay inuu xiriiro ballaaran la sameeyo GNC wuxuuna ka qeybqaatay Shirkii Sanadlaha ahaa ee GNC. Ka qeybqaadashadaan waxay ARDI u fududeysay fursadaha xiriirka oo ay la yeelatay hay'ado badan oo caalami ah ee aan dowli ahayn waxayn siisay goob lagu wadaago khibradaha ARDI si ay kuwa kale wax uga bartaan.

> 'Taageerada Isbaheysigu bixiyay waxay aheyd wax dhaafsanaa filashooyinkeena. Shaqaaluhu waxay kor u qaadeen xirfadahooda waxayna hadda bulshada dhexdeeda ku adeegsanayaan xirfadahooda Taageero noocaas ah hore uma aanan helin.'
>
> \- **Cabdi Mooge Maxamed**

## Maxaa xiga ee dhanka **Isbaheysigu taageerayo NGY-yada deegaanka?**

Isbaheysiga waxaa ka go'an in uu taageero hay'adaha maxalliga ah ee aan dowliga ahayn si ay uu daboolaan baahiyadooda farsamo. Waxay hadda raadinaysaa xirmooyin taageero oo kala duwan iyo siyaabo si wax ku ool ah loogu taageeri karo NGO-yada noocaas ah si ay u buuxiso hadafyadooda iyo ujeeddooyinkooda.

Iyada oo waayo-aragnimo u leh la shaqeynta ARDI, Isbaheysigu wuxuu ka fikiraayey muhiimadda helitaanka taageero luuqadeed oo wanaagsan iyo in si dhow loo la shaqeeyo khubarrada gudaha dalka. Isbaheysiga wuxuu haatan ka shaqeynayaa horumarinta nidaamyada si uu ugu oggolaado in uu si hufan uga faa'iideysto illaha deegaanka (oo ay ka mid yihiin la-taliyeyaal iyo xafiisyada TST ee bahwadaagta ah). Isbaheysiga wuxuu sidoo kale eegayaa in u iskaashi la sameeyo ururrada kale ee diiradda saara xoojinta awoodda urur si ay u dhameystiraan shaqada ay qabtaan.

Si aad wax badan uga ogaato Isbaheysiga ama aad u weydiiso su'aal ama aad si toos ah uga codsato taageero, fadlan halkaan riix:
https://ta.nutritioncluster.net/request-support
ama i-meel u dir xubin ka tirsan Isbaheysiga ee:
technicalalliance@nutritioncluster.net